



Caddeynta Xiriirka Qoyska (AOR)  
waa foom loo adeegsado dib  
isugu keenista qaxootiga ama  
dadka is dhiiba ehelkooku ku nool  
yahay dunida meelo ka baxsan  
Mareykanka. Si aad u diiwaangeliso  
qoyskaaga, foomka AOR waxa  
uu fursad kuu siinayaan codsiga  
Qaxootiga ee Mareykanka.  
Marka aad soo gudbiso foomka oo  
laga shaqeeyo, waxaa suurtagal ah  
in ehelkaaga dunida kale jooga loo  
balamiyo wareysi si loo ogado in ay  
ka soo bixi karaan shuruudaha lagu  
soo qaadayo oo dib loogu dajinayo.

## Adeegga Qaxootiga iyo Dadka Soo Haajirey

80 Sherman Street  
Portland, ME 04101  
T. (207) 523-1160  
F. (207) 871-7465  
[aor@ccmaine.org](mailto:aor@ccmaine.org)

[RefugeeImmigrationServicesCCM.org](http://RefugeeImmigrationServicesCCM.org)

*Caddeynt  
a rasmiga*



*Dib isu keenista  
qoysaska ku kala*



4/2015





### Dheecaanka DNAAda

Haddii aad codsnayso qof dhiig ahaan dhalasho kuugu xiran, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad iska qaadaan DNA. Adiga ayaa lagaa doonaya in aad iska bixiso kharashka baaritaanka iyo kharashka loogu dirayo waddanka dibadiisa. Baaritaanka waxaa laga sameyn karaa sheybaarada AABB. Weydii hay'adda dib u dajinta goobaha ay ku yaalaan hay'adaha dib u dajinta.

### Nidaamka u degsan dib u celinta (bixinta) lacagta

Si lacagta laguugu celiyo waa in ay dhab tahay xiriirka idinka dhaxeeya. Hay'adda Qaxootiga ee Caalamiga ah way idiiin celineysaa wixii kharash ah ee idinka baxay marka la xaqijiyo xiriirka idinka dhaxeeyo inuu mid jira yahay. Lacagtaada waa laguu celinaya si kasta oo natijjadu noqotoba. Xiriirka oo la xaqijiyo balan qaad uma aha in la soo qaadayo.

### Yaa codsan kara?

Qof kasta oo da'idu tahay 18 jir ama ka weyn oo wadanka Mareykanka ku yimid qaxootinimo ama la siiyey magan galoo siyaasadeed shantii sano ee la soo dhaafay kana yimid wadama hoos ku xusan:

|                                  |                   |
|----------------------------------|-------------------|
| Afghanistan                      | Guwatamaala Hayti |
| Bhutan                           | Honduras          |
| Burma                            | Iiraan            |
| Burundi                          | Ciraaq            |
| Janhuriyadda Dhexe ee Afrika     | Maali             |
| Colombia                         | Soomaalya         |
| Kuuba                            | Koonfurta         |
| Jamhuriyadda Dadka ee Kuuriya    | Suudaan           |
| Jamhuriyadda Dimoqraadiga Koongo | Sirilanka         |
| El Salfadoor                     | Sudan             |
| Eritariya                        | Siiriya           |
| Itoobiya                         | Uzbakistaan       |
|                                  | Ouzbekistan       |

## S u'aalaha inta Badan La Isweydi Karo

### Yaan u dacwoon karaa?

Dadka ka soo baxa shuruudaha waxa ay u codsan karaan in loo keeno xaaskaaga/seyyaaga haddii aad is guursateen ka hor inta aadan imaan Mareykanka, caruurgaan ka guursan oo da'doodu ka yar tahay 21 sano, iyo waalidiinta iyo caruurtooda ee ilmaha da'doodu ka yar tahay 21 sano. Qoysakaagu waa in ay ku nool yihiin meel ka baxsan waddanka ay u dhasheen waana in ay qaxooti ahaan uga diiwan gashan yihiin waddankaas. **Firo gaar ah:** Codsiyada wadamada Siiriya, liraan iyo Kanada lama qabanayo codsiyadooda.

### Halkee ayaan foomka geynayaa?

Codsiga foomka AOR waa in loo soo gudbiyaa hay'adaha dib u dajinta. Waa lacag la'aan.

### Waa maxay macluumaadka aan u baahantahay?

Macluumaadka lagaa doonayo waxaa ka mid ah:

- Magacyada sadexan ee ethelkaaga saxna ah
- Xiriirka idinka dhaxeeya
- Taariikhda dhalashada iyo guurka
- Cinwaanka laga heli karo ee halka ay ku nool yihiin
- Caddeyn muujineysa sharciga aad waddanka ku joogto
- Shahaada dhalashada iyo guurka; dokumentiga kale ee rasmiga ah
- Sawir qiyaasta baasaboorka ee qof kasta oo qoyska ka tirsan

### Kharashka igu baxa marka aan tagayo sheybaarka ma la ii celinaya?

Maya, kharashka gaadiidka laguuma celinayo. Hay'adda dib u dejinta ee kula shaqeyneysa aaya kaa caawineysa in aad hesho sheybaarka kuugu dhow.

### Intee ayey qaadataa natijjada DNAAda?

Muddo aan la garaneyn



### Maxaa dhacaya haddii sheybaarku sheego in aan qofka is laheyn?

Waa in aad la tashataa hay'adda dib u dajinta

### Xagee ayaa qoyskeygu tagayaa si loogu sameeyo baaritaanka?

Xarunta RSC ee halka ay joogaan ayaa kula socodsiineysa goobta looga qaadayo DNAAda.

### Maxaa dhacaya haddii aanan awoodi karin bixinta kharashka DNAAda ee qoyska oo dhan? Baaritaanka ma loo sameyn karaa si gooni gooni ah?

Marba haddii laguu soo diro warqadda ay ku qoran yihiin magacyada qoyskaaga ee candhuufta laga qaadayo, waa in aad markaas iibsataa DNA qof kasta lagu baarayo qof kastana waa inuu diyaar u ahaadaa in markaas laga qaado. Wixii dareen ah ama su'aal kala hadal hay'adda dib u dajinta.

### Xagee loo dirayaa natijjada baaritaanka? Yaase arkaya?

Natijjada waxaa toos loogu dirayaa adiga iyo hay'adda dib u dajinta (RPC). Wakiilo ka tirsan waaxda scodaalka ee Mareykanka (USCIS), Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo RSC ayaa arki kara natijjada.

Si aad u sameysato balan aad ku buuxiso foomka AOR, fadlan soio wac 207-523-1160

Haddii aad dooneyso turjubaan, fadlan nala socodsii marka aad balanta dhiganeyso, tarjubaan lacag la'aan ah ayaa laguu diyaarinaya.